



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali,

Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Diisambar 4, 2020

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Heshiiska Taageerada Shaqaalaha

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa sii wada in uu fiiriyo siyaabo lagu xaqiijinayo in aanu sameynayno wax kasta oo suurtagal ah si dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka looga dhigo kuwo badbaado ku sugan haddii uu dillaaca COVID-19 ka jiro guriga.

Iyada oo qayb ka ah dadaalada socda, ODD waxay dhawaan soo saari doontaa Codsiga Arjiyada (RFA) oo loogu talagalay daryeel bixiyayaasha si ay ula shaqeeyaan dadka looga shakiyay, loo qaatay ama la ogaaday in ay qabaan cudurka COVID-19 ama ku waayay shaqaale iyada oo ay sababtu tahay COVID-19. Iyada oo sababtu tahay baahida degdega ah ee loo qabo taageerada shaqaalaha, daryeel bixiyayaasha wax daneynayaa waxay la xiriir karaan Heather Smith, HEATHER.M.SMITH@dhs.oregon.gov.

Daryeel bixiyayaasha ayaa laga codsaday in ay bixiyaan shaqaalaha Xirfada Taageerada Tooska ah (DSP) ee guryaha gaarka ah, guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood iyo guryaha daryeelka ilmo korsiga sida uu aqoonsaday ODDS ee loogu talagalay dadka looga shakiyay, loo qaatay ama la ogaaday in ay qabaan cudurka COVID-19 ama shaqaale ku waayay iyada oo ay sababtu tahay COVID-19. Intaasi waxaa dheer, daryeel bixiyayaal kasta oo leh guri bannaan ama ijaara si uu hoy meel gaar ah ugu noqdo dadka muddo ugu yaraan lix bilood ah ayaa sidoo kale lagu marti qaadayaa in ay codsadaan.

Marka ay noqoto RFA, ODDS ayaa bixin doona qiime lacageed oo dhan 1,600 toddobaadkii oo loogu talagalay DSP kasta oo la qoondeeyay. Haddii daryeel bixiyuhu bixinayo guri bannaan, ODDS ayaa bixin doona lacagta ijaarka oo gaaraysa ugu badnaan \$3,000 bishii taasi oo loogu talagalay guriga la aqoonsaday.

RFA way u furnaan doontaa daryeel bixiyayaasha ODDS ee hada jira, ama wixii hay'ad/urur ah ee diyaar u ah in ay u qalmaan helida lacagta Medicaid iyo in ay adeegyo ka bixiyaan Oregon.

Faahfaahinta RFA waxaa dhawaan la soo galin doonaa:
<http://orpin.oregon.gov>.

Waad ku mahadsan tahay wax kasta oo aad sameynayso si aad naftaada, qoyskaaga iyo dadka reer Oregon ee qaba I/DD uga dhigto kuwo badbaado iyo caafimaad qaba inta lagu jiro wakhtigan.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.